

Aristoteles (384-322 BC.)

Aristoteles wxa uu arday u ahaa Platon, laakiin fikir ka duwan ka Platon ayuu ka aaminsanaa waxa uu dadku yahay. Waxa uu mashquul ku ahaa, inuu aqoon ka helo noolaha oo dhan, waxa kale oo uu xiisaynayay xayawaanka, iyo dhirta.

Xiisaha uu u hayey noolaha ayaa saamayn ku yeelatay. Aristotels waa uu ka fikir duwanaa Platon. Waxa uu aminsanaa in aanay jirin wax layidhaa aduunka fikirka, laakiin ay jirto qaabab fara badan oo nolosha ah. Aristoteles waxa uu arkay in wax kasta oo dabeeecadda ku nooli ay is badalayaan mar kasta. Waxa uu aaminsanaa in isbadalku uu yahay wax wanaagsan, waayo dabeeecaddu waxa ay u shaqaynaysaa si wanaagsan.

Aristoteles waxa uu arkay in wax kasta oo dabeeeci ahi uu isbadalayo had iyo jeer. Waxa uu yidhi midhaha geedka ee yar marka hore waxay noqdaan midho waawayn waqtii ka dib, muraxareeraadkuna waxa uu isku badalaa rah, Wax kasta oo dabiici ahina way isbadalaan ilaa ay ka gaadhayaan yoolkooda. Aristoteles ruuxda wuxu ku tilmaamay habka noole kala duwani u noolyihii oo u horumarto. Tusaale rahu waa inuu boodo oo ciyo, waa ruuxda raha. Haddii raha baabuur dulmaro, ruuxda iyo jirkuba way baaba,aan, waayo rahu ma boodboodi karo mana ciyi karo.

Aristoteles Waxa uu rumaysnaa qofku waxa uu horumar sameeyaa marka uu isticmaalo caqliga, iyo kartidiisa uu ku fikiro. Markaa qofku wuxu noolyahay nolol fiican. Fayloosoofkani waxa uu hadana aaminsanaa, in dadku kala duwanyihii, mana uu rumaysnayn dumarka, iyo addoomuhu inay leeyihii fursadaha ay haystaan ragga xorta ahi.

Aristoteles waxa uu yidhi, qofka raba inuu fraxsanaado, waa in uu isticmaalaa kartidiisa fikir. Waxa uu aaminsanaa dadka macquulka ah iyo kuwa caqliga badani, mar walba waxa ay sameeyaan waxa saxda ah. Waxa ay

nu samaynaa waxaa saxda ah marka aan raacno jid dhexaadka dhabta ah. Taa macnaheedu waxa weeye, waa mihiim in aad muujiso adkeysi ama geesinimo laakiin waxa qalada in ad fulaynimada iyo badheedhka. Waa sax in aad deeqsi noqotaa, laakiin waa qalad in aad bakhayl, ama khasaariye noqoto.

Kilde: Inn i livet7

Sax ama qalad?

Aristoteles wuxu ahaa ardaygii Platons.

Aristoteles waxa uu xiisaynayey dabeecadda.

Aristoteles waxa uu rumaysnaa aduunka fikirka.

Qof faraxsani waa qof macquul ah sida uu yiri Aristoteles.

Dumarka, ragga xorta ah iyo addoomuhu way sinnaayeen sida

Aristoteles sheegay.

Qofku waa inuu raacaajid dhextaadka dhabta ah, ayuu yiri Aristoteles

Ku qor erayo Noorwiji ah shaxda turjunna.

EIKETRE GAVMILD LYKKELIG FROSK SLØSETE RUMPETROLL FEIG DEN GYLNE
MIDDELVEI LIV KVEKKE GJERRIG EIKENØTT DUMDRISTIG